

# Eureka! MUSTAQBALKAAGA ARAG OO NOQO MID AAN LA HOR ISTAAGI KARIN!

eliminating racism  
empowering women  
**ywca**  
Minneapolis

**girls  
inc.**  
YWCA  
Minneapolis



**Eureka!** waa barnaamij shan sano ah oo la qabto xagaaga iyo sanad-dugsiyeedka looguna talagalay gabdhaha xiiseeya qaybaha cilmiga ee STEM (sayniska, tiknoolajiyada, injineernimada iyo xisaabta).

Barnaamijka Eureka! waxaa uu taageeraa gabdhaha dhigta fasalka 8-aad ilaa qalin-jabinta dugsiga sare, isagoo u diyaarinaya talaabada xigta ee ku aadan waxbarashadooda dugsiga sare kadib.

Dhallinyaradu waxay saaxiibtinimo la yeeshaan gabdhaha ka socda dhammaan Magaalooyinka Mataanaha waxayna raadiyaan danaha iyo riyoyinka xirfadeed. Waxay sidoo kale la kulmaan munaasabadooyinka iyo hawlaha kobcinta oo billaha ah inta lagu gudajiro sanad dugsiyeedka.

Gabdhaha u qalma inay codsadaan waa ardayda hadda dhigata fasalada 7-aad (fasalada 8-aad marka la gaaro Deyrta 2022) iyaga oo danaynaya STEM iyo ka qaybqaadashada barnaamij shan sano ah.\*

**Gabdhaha waxay ka qaybqaadanaayaan** casharrada dabaasha, isboortiyada, safarada dibbada, shaybaarada STEM (kuwaasoo ay hogaaminayaan macallimiinta iyo ardayda Jaamacada Minnesota), shaqo barashada, hawlaha gacmaha lagu qabto iyo hormarinta shaqsiyeed.

Cunto fudud iyo qado ayaa la bixiyaa. Lacag go'an ayay heli karaan kuwa dhammaystira barnaamijka.

**Barnaamijku waa LACAG LA'AAN. Codso maanta!**

\*Sidoo kale waxaa la aqbalaya tiro xaddidan oo codsiyo ah oo loogu talagalay boosaska kooxdayada Halyeyada (fasalka 9-aad ee Deyrta 2022).



## Eureka! Saamaynta Barnaamijka



**96%** reer Eureka waxay aaminsan yihiin in barnaamijkan uu ka caawiyay inay ka fikiraan mustaqbalkooda



**98%** reer Eureka waxay sheegeen inay haystaan qof weyn oo aaminsan inay guulaysan doonaan



**98%** reer Eureka ayaa qorsheynaya inay dhigtaan kulliyad

YWCA Minneapolis Girls Inc. waxaa ka go'an inay siiso gabdhaha mahadhada Girls Inc oo dhameystiran, oo ay ku jiraan kuwa isku aqoonsan inay yihiin gabdho iyadoo la eegayn jinsiga ay ahaayeen xilligii dhalashada. Waxaan soo dhawaynaynaa dhallinyarada loo aqoonsan yahay inay yihiin gabdho, gabdhaha jinsigoodu ahayn kii ay ku dhasheen iyo shaqsiyaadka labo jinsi iyo ka badan ah.



## Codso Maanta

Codsiyada waxaa la filaayaa Isniinta, Maarso 28, 2022.

Codsadayaasha waxaa iimayl ahaan lagu ogeysiin doonaa xaalada codsigooda. Wareysiyada waxaa la qaadi doonaa inta lagu guda jiro Abriil. Codsiyada soo daaha lama tixgelin doono.

Si aad u codsato, ku sawir koodhka QR-ka taleefoonkaaga casriga ah, nagu soo booqo onlaynka barta [ywcampsls.org/girlsinc](http://ywcampsls.org/girlsinc) ama nagala soo xiriir lambarka 612-215-4369 ama [girlsinc@ywcampsls.org](mailto:girlsinc@ywcampsls.org)



### LOOGU TALAGAIY GABDHAHA GALAYA



## 8 aad -fasalka

INTA LAGU JIRO DEYRTA 2022\*

- Daneynaya STEM
- Ay ka go'an tahay barnaamijka shanta sano ah
- Ku faraxsan inay xiriir walaalnimo la yeeshaan gabdhaha guud ahaan Magaalooyinka Mataanaha ah

\*Sidoo kale aqbalaya tiro xaddidan oo codsiyo ah oo loogu talagalay boosaska kooxdayada Halyeeyada (fasalka 9-aad ee Deyrta 2022).

## Taariikhaha Xagaaga 2022

**Juun 27 - Luulyo 22**  
(Kaamka ma jiro Luulyo 4)

Isniinta - Khamiista: 8:30 subaxnimo - 5:00 galabnimo  
Jimcaha: 8:30 subaxnimo - 2:00 galabnimo

Goobta: YWCA Midtown iyo Jaamacada Minnesota

Geynta iyo ka soo qaadista YWCA Midtown  
2121 East Lake Street, Minneapolis, MN 55407



### SHAN-SANO

## Barnaamijka Xaggaaga & Sanad dugsiyeedka

### Xagaaga:

#### Sanadka 1aad: Kaamka maalinta

Rookies oo lagu qabanayo Kulliyadda Sayniska iyo Injineernimada ee Jaamacada Minnesota (CSE)

#### Sanadka 2aad: Kaamka Maalinta

Halyeeyada ee ka dhacayso Jaamacadda Minnesota CSE

#### Sanadka 3aad: Ku tababarashada shaqo

Khibrada shaqo

#### Sanadka 4aad: Duuliyayaasha

Fursada Madaxbanaan ee STEM

#### Sanadka 5aad: Qalinjabiyayaasha

Mahadhada habeenka oo dhan iyo u diyaarowgakulliyada

Xerada maalinta ee Jaamacadda Minnesota waxay noqon kartaa mid isku dhafan (mahadhooyin fool-ka-fool iyo fogaan arag labadaba ah) ama gebi ahaanba fogaan arag ah.

### Sanad dugsiyeedka:

Munaasabadooyinka billaha ah, aqoon-isweydaarsiyada iyo safarada banaanka